



Freight System Plan

Waaxda Gaadiidka ee Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation, WSDOT) ayaa wax ka badalaysa Qorshaha Nidaamka Gaadiidka (Freight System Plan, FSP) ee Gobalka Washington shantii sanaba mar. Wax ka badalka hadda ayaa socda waxaana la filayaa in la dhamaystiro dhammaadka sanadka 2022. Waxaa lagu qiimayn doonaa dhammaan isku socodka gaadiidka -- ayna ku jiraan gaariyaasha xamuulka, diyaaradaha, tareenka, iyo maraakiibta xamuulka qaada.

Gaadiidka ku filan, badqabka leh oo la isku halayn karo oo badeecooyinka u kala qaadaaya daafaha Washington ayaa muhiim u ah qayb kasta oo kamid ah dhaqaalahal nolosha bulshada ee Waqooyi-Galbeed ee badda Baasifiga. Nidaamka isku xiran ee dekadaha, garoomada diyaaradaha, marinnda tareenka iyo maraakiibta ayaa ah mawduuc qaab sii kordhaaya looga hadlaayo wadanka oo dhan, maadaama aafada cudurku ay saamayn ku yeelatay habdhaqanka macamaiisha, hoos u dhaca shaqaalahal iyo hoos u dhaca agabka. Isbadalaan ayaa saamayn ku yeeshay hanaanka saadka ee caalamka. Arintaas awgeed, macaamiisha ayaa aqoonsanaaya baaxada nidaamka gaadiidka iyo muhiimada uu u leeyahay nolol maalmeedka.

Nidaamka qaababka kaladuwan ee gaadiidka gobalka ayaa maamula ku dhawaad 600 oo milyan oo tan oo alaabta xamuulka ah sanad kasta, qiimahooduna u dhigmo \$677 bilyan oo doolar.

2022 Freight System Plan

WSDOT ayaa hadda cusboonaysiin ku wada qorshaha FSP ee 2022, kaasoo lagu doonaayo in lagu dhiso nidaamka gaadiidka oo awood badan, adkaysi leh, lehna badqab ayadoo:

- Aqoonsanaysa baahiyaha degdega ah iyo kuwa mudada fog ee nidaamka gaadiidka
- Soo jeedinaysa xeelad maalgashi oo lagu samaynaayo nidaamka
- Ayadoo qeexaysa siyaasaadka iyo barnaamijyada loo baahan yahay si loo taageero tignooloojiyada aadka u kobcaysa loona adeegsanaayo ee gaadiidka
- Ayadoo isku dhafaysa siyaasaadka iyo barnaamijyada si looga difaaco bulshooyinka iyo deegaanka ku xeeran gaadidka saamaynada xun ee isku socodka badeecooyinka

FSP ayaa aqoonsan doona taxaneyaasha, ciladaha, iyo baahiyaha la filaayo inay saamayn ku yeeshaan nidaamka gaadiidka ee Washington iyo xeeladaha kaladuwan ee loogu diyaar garoobaayo mustaqbalka. Dhaqan gelinta guulaystaha ee taloooyinkaayaa u baahan wada shaqayn iyo taageero laga helo iskaashatooyinka kaladuwan, sida wakaaladaha maxaliga ah, kuwa gobalka, kuwa dawlad goboleedka, iyo kuwa federaalka, Qabiillada waawayn, dekadaha, wadooyinka tareennada, garoomada diyaaradaha, iyo saamileeyda kale ee gaadiidka. Waxyaabaha taagan iyo caqabadaha lagu dari doono qorshaha FSP waxaa ku jira waxyaabaha soo socda:

- **Muhiimadaha Dhaqaalahal:** Waxa aku jira mawduucyada sida waxyaabaha markaas ka taagan helitaanka badeecooyinka; ilaha badeecada, wax soo saarka, iyo warshadaynta; aruurinta, kaydinta, iyo bakhaar ku haynta; hoos u dhaca darawallada gaadiidka xamuulka; iyo u gaynta alaabaha goobaha ganacsiga iyo macaamiisha.

- **Ilaalinta:** Wuxuu diirada saarayaa joogtaynta iyo ilaalinta baahiyaha kaabeyaasha wadooyinka, wadada tareenka alaabaha qaada, maraakiibta, iyo kaabayaasha garoomada diyaaradaha.
- **Badqabka:** Waxaa ku jira dhacdooyinka badqabka la xariira, daadashada saliida, iyo baakinka gaariyaasha xamuulka ah.
- **Isku-socodka:** Wuxuu faahfaahinayaa saamaynada ka dhasha jaamka iyo awooda gaadiidka, iyo dhibaatooyinka fursadaha dhanka wadooyinka.
- **Bii'ada:** Waxaa ku jira isbadelka cimilada, difaaca duur joogta, iyo cadaalad u samaynta bii'ada.
- **Taageerada:** Waxaa ku jira mawduucyada la xariira maalgelinta gaadiidka, xariirada qabiilka, iyo fursadaha wada shaqaynta iyo iskaashiga ee ka jira gobalka Waqooyi-galbeed ee Baasifiga.

Door ka qaado

Dhammaan inta lagu jiro gu'ga iyo xagaaga 2022, WSDOT ayaa aruurin doonta talada iyo fikirka khubarada gaadiidka, hogaamiyaasha dhaqaalaha, madaxda la doortay, saamileeyda ganacsiga iyo warshadaha, iyo bulshooyinku uu saamaynta ku yeeshay isku-socodka gaadiidku, iyo sidoo kale dadwaynaha guud, si loo dhiso qorshe buuxinaaya baahiyaha hadda iyo kuwa mustaqbalka ee qof kasta oo ku dhaqan Gobalka Washington.

Qabyo qoraalka qorshaha FSP ee 2022 ayaa diyaar u noqon doona dib u eegista bulshada xiliga Xagaaga ee 2022 FSP kama danbaysta ahna waxaa la daabici doonaa dhammaadka 2022.

Xogta Xariirkka

Trevor Daviscourt

Qorsheeyaha Nidamayada Gaadiidka ee Noocyada Badan

FreightPlan@wsdot.wa.gov

Adeegyada Turjumaada

Haddii ay kugu adag tahay inaad fahamtid Ingiriisida, waxaad, bilaash, ku codsan kartaa adeegyada caawimada luuqada adoo wacaaya (360) 705-7090 ama iimayl noogu soo dir: [TitleVI@WSDOT.WA.GOV](mailto>TitleVI@WSDOT.WA.GOV).